



## Sii-daynta wararka

### Hagaajinta qiimaynta kalkaalisada

Febraayo 15, 2023

---

Dowladda Alberta waxay bilaabaysaa mashruuc tijaabo ah oo cusub si ay u abuurto nidaam qiimayn wax ku ool ah oo loogu talagalay kalkaaliyayaasha waxbarashada caalamiga leh ee imanaya Alberta.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka safka hore ee ugu fiican adduunka, dowladduna waxay ka shaqayn doontaa sidii ay u heli lahayd taageerooyinka saxda ah si loo helo loona hubiyo in reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin, goorta iyo meesha ay uga baahan yihiin. Iyadoo la wanaajinayo hababka kalkaaliyayaasha leh waxbarashada caalamiga si ay ugu biiraan xoogga shaqada ee Alberta, dowladdu waxay gacan ka geysan kartaa hubinta in nidaamka daryeelka caafimaadka ee gobolku uu sii ahaado mid xooggan, hadda iyo mustaqbalka.

"Iyadoo loo marayo tijaabadan, waxaan hagaajineynaa qiimeynta kalkaalisada si kalkaaliyayaasha leh waxbarashada caalamiga ay awood u yeeshaan inay go'aamiyaan dariiqooda ugu wanaagsan ee loo maro suuqa shaqada iyo nidaamka daryeelka caafimaadka Alberta."

*Kaycee Madu, Wasiirka Ganacsiga Xirfadlayaasha iyo Mihnadaha*

"Waxaa naga go'an inaanu meesha ka saarno caqabadaha hortaagan kalkaaliyayaasha wax ku bartay caalamka ee raba inay ka shaqeeyaan kuna noolaadaan Alberta. Marka la hagaajiyo habka, kalkaaliyayaashu waxay bilaabi karaan inay ku dhaqmaan isla

markiiba iyo annagoo sii wadi doona xoojinta shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee bixiya taageerada reer Alberta goorta iyo meesha ay uga baahan yihiin."

*Jason Copping, Wasiirka Caafimaadka*

Deeq lacageed oo dhan \$200,000, mashruuca tijaabada ah ee "saddexda-raadracc" wuxuu Alberta ka dhisi doonaa xarun qiimeyn oo loogu talagalay kalkaaliyeyaal caalami ah oo wax bartay waxayna u oggolaan doontaa inay ka codsadaan Kuliyaadda Kalkaaliyeyaasha Diiwaangashan ee Alberta, halkii ay u safri lahaayeen British Columbia si xirfadahooda loo qiimeeyo.

Barnaamijku waxa uu qiimayn doonaa xirfadaha iyo kartida kalkaalisoooyinka wax ku bartay caalamka waxana uu la mid noqon doonaa mid ka mid ah saddexda qaybood ee kalkaalisada shaqada ee Alberta: kalkaalisada diiwaangashan, kalkaalisada shaqada ee ruqsadeysan iyo kaaliyaha daryeelka caafimaadka. Tani waxay gacan ka geysan doontaa hagaajinta nidaamka aqoonsiga waxayna yareyn doontaa waqtiyada sugitaanka kalkaaliyayaasha wax ku bartay caalamka ee raadinaya inay ku biiraan xoogga shaqada Alberta.

"Kulliyadda Kalkaaliyeyaasha Diiwaangashan ee Alberta waxay taageeraysaa oo soo dhawaynaysaa maalgelinta cusub ee nidaamka daryeelka caafimaadka Alberta si loo habeeyo, loo casriyeeyo loona wanaajiyo dariiqyada hadda jira ee kalkaaliyayaasha caafimaadka caalamiga ah ee imanaya gobolkan."

*Joy Peacock, madaxa fulinta iyo diiwangeliyaha, Kulliyada iyo Ururka Kalkaaliyeyaasha Diiwaangashan ee Alberta*

"Kulliyadda Kalkaaliyeyaasha Caafimaadka Ruqsadda leh ee Alberta waxay u heellan tahay inay taageerto kalkaaliyayaasha caafimaadka caalamiga xagga socdaalkooda kalkaalisanimu. Samaynta xarun qiimeyn gudaha Alberta waxay siisaa fursad codsadhaha si loogu muujiyo xirfadahooda iyo aqoontooda iyadoo la taageerayo

fahamka sida ay khibradooda Alberta ula mid tahay, taasoo awood u siinaysa kalkaaliyayaashu inay doortaan jidka ugu habboon iyaga."

*Jeanne Weis, diiwangeliyaha iyo madaxa fulinta,  
Kulliyadda Kalkaaliyaasha Ruqsadda leh ee Alberta*

Goobta qiimaynta Alberta oo adeegsanaysa qaabka cusub ayaa la filayaa in la furo dayrta 2023.

### **Xaqiiqooyinka degdega ah**

- Qaabka cusub ee qiimaynta ku salaysan kartida ayaa sahlaya qiimaynta kartida kuwa doonaya inay ka shaqeeyaan nidaamka daryeelka caafimaadka. Ma aha beddelka qaabka qiimaynta aqoonsiga, kaasoo sii ahaan doona mid la heli karo.
- Qiimaynta "saddexda-raadraac" waa mashruuc tijaabo ah oo u dhexeeya Kulliyadda Kalkaaliyayaasha Diiwaangashan ee Alberta, Kulliyadda Kalkaaliyayaasha Ruqsadda leh ee Alberta iyo Adeegga Qiimaynta Bulshada Kalkaalinta.

### **Xogta la xidhiidha**

[Qorshe Hawleedka Daryeelka Caafimaadka](#)

[Kulliyadda Kalkaalisoooyinka Ruqsadeysan ee Alberta](#)

[Kulliyadda Kalkaalisada Ruqsadeysan Khibrada leh ee Alberta](#)

### **Weydiimaha warbaahinta**

Nicky Gocuan

[Nicky.Gocuan@gov.ab.ca](mailto:Nicky.Gocuan@gov.ab.ca)

587-588-5952

Xoghayaha Warbaahinta, Xirfadaha Farsamada iyo Mihnadaha Alberta